

# Wargeyska Mountain View

## Maarso 30, 2016

Jimco, Abriil 1.....Quraacda Gudaha Fasalka Waxay Bilaabataa 7:55 a.m.  
Talaado, Abriil 12.....Barnaamijka Fiyoliinka Virtuoso, 5:00 p.m., Qolka Auditorium  
Talaado, Abriil 12.....Waalidiinta iyo Macmacaanka, 8:15 a.m., CLC Qolka 183  
Talaado, Abriil 19.....Diiwaan Gelinta Isu Diyaarinta Xanaanada Kuleylaha

### Waalidiinta iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qabto Waalidiinta iyo Macmacaanka waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center) maaalinta Talaadada, Abriil 12, marka ay tahay 8:15 a.m. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

### Quraacda Fasalka

Dugsiga Hoose Mountain View wuxuu ku hawlan yahay in uu wax ka baddalo sida aan u bilowno maalintena. Waxaan ku faraxsanahay in aan ku dhawaaqno in laga bilaabo Abriil 1 dhamaan ardaydena la siin doono quraac lacag la'aan ah. Gambaleelka kowaad wuxuu dhici doonaa 7:55, hase ahaatee ardayda waxay soo geli doonaan safka si ay u qaataan quraacda ay u qaadan karaan gudaha fasalka si ay ula cunaan asxaabtooda. Ardayda waxay soo gabogabeyn doonaan cunidda quraacda fasalka ugu dambayn 8:10, marka ay iska tuuraan qashinka, kaddibna xoogga saaraan shaqada fasalka. Waalidiinta waxaa la weydiin doonaa in ay u ogolaadaan ardaydooda in ay quraacda la tagaan gudaha fasalka iyadoo aysan la joogin waalid aama walaalaha ka weyn, si ay u dhisaan bulshada fasalka una kordhiyaan heerka madaxbanaanidooda. Dabcan, haddii waalidiinta rabaan in ay ku shaqeyaan iskaa wax u qabso, waxay iska xaadiri karaan xafiiska, kaddibna waxay halkaas ka heli karaan warqadda (sticker) iskaa wax u qabso. Macluumaad badan oo ku saabsan qorshaha Quraacda Fasalka ayaad heli doontaa goor dhaw.

### Diiwaan Gelinta Xanaanada Ka Hor (Pre-Kindergarted Registration)

Abriil 7, 8 iyo 11 waxaan bilaabi doonaa diiwaan gelinta barnaamijka Xanaanada Ka Hor **maalinta-buuxda**, Caruurnimada Hore (Early Childhood). Diiwaan Gelinta waxaa lagu qaban doonaa xafiiskena ku yaal **Glendale/Mountain View Community Learning Center, 1388 South Navajo Street**, laga bilaabo 8:30 a.m. ilaa 6:00 p.m. **Taariikhdaas kaddib, diiwaan gelinta waxay socon doontaa** saacadaha caadiga xafiiska, 8:00 a.m. ilaa 4:30 p.m. ilaa fasalada ka buuxsamaan.

Fursadaha maalinta buuxda ee Xanaanada Ka Hor 2016-2017 waxaa mar kale laga heli karaa Mountain View. Barnaamijkaan Caruurnimada Hore waxaa loo sameyay caruurta gaarta afar sanno ugu dambeyn Sateembar 1, 2016. Ardayda waxay tagaan Pre-K saacadaha dugsiga caadiga, 4 maalin todobaadkii, Isniin

ilaa Qamiis. Waalidiinta waxay bil kasta bixiyaan kharashka waxbarashada oo ah \$150.00 ama laga yaabo in la bixiyo sicir la dhimay oo ku saleysan tixgellinta dakhliga marka waalidiinta keenaan macluumaadkooda canshuurta 2015.

Xogta dagmada waxay taageersan tahay wxtarka barnaamijkaan Xanaanada Ka Hor ee tayada sare, waxayna muujisaa in faragelinta hore goor dambe fa'iido u leedahay ardayga iyo nolosha. Barnaamijkaan maalinta buuxda wuxuu muujiyay in uu hagaajiyo dhaqaaqa, imaashada, iyo buundooyinka imtixaanka.